CODKA ISBEDELKA

Wacyigelin, Awoodsiin iyo Badbaadin
ka hortagga dhaqamada xunxun

FSAN | Federatie Somalische Associaties Nederland

Tusmada buugga

1. **Hordhac** 3
2. **Maxay yihiin dhaqamada dhibaatada leh?** 4
3. **Gudniinka gabdhaha** 5
4. **Guurka qasabka** 11
5. **Ka soo tegida/dhaqan celis** 14
6. **Rabshadaha la xiriir sharafta** 16
7. **Caawinaada jira** 18

1. Hordhac

Buug yarahani waxaa loogu talagalay dadka soo galootiga iyo dadka qaxootiga oo raba inay wax dheeraad ka ogaadaan dhaqamada dhibaatada leh.

Waxaan rabnaa inaan kuugu deeqno warbixin qiimo leh si aan kaaga caawino inaad fahanto waxa ay yihiin dhaqamada xun xun ama dhibaatada leh, sababaha ay u dhacaan, waxa uu qabo sharciga Nederlaanka iyo sidaa aad nafsadaada iyo tan dada kale u badbaadin karto.

Ulajeedadeena waa inaan wacyigelin abuurno, wadahadalka ka qeyb qaadano iyo dhiiro gelino si tallaabo loo qaado.Wadajir ayaan isbedel wanaag ah ku gaari karnaa iyo aan taakulo ka geysan karnaa si dunida u noqoto mid ay dhaqamada dhibaatada leh ka dhamaadaan.

2. Maxay yihiin dhaqamada dhibaatada leh?

Dhaqamada dhibaatada leh ama xun xun waa magac guud oo noocyada cadaadin iyo dhibaateena ilmaha (gaar ahaan gabdhaha) iyo dumarka kuwaasoo si qoto dheer ugu xidideysan caadooyinka, dhaqanka iyo diinta iyo/ama khuraafaadka.

Waxay inta badan ku salaysan yihiin aragtiyo adag oo ku saabsan galmada iyo jinsiga. Dhaqamadan waxay geystaan dhibaatooyin daran oo jir ahaan, dareen ahaan iyo nafsiyada ahaanba dhaawacyo, sababtaa darteeda ayey Nederlaan ka mamnuucan yihiin.

Dhaqamada dhibaatada leh ee buuggaan lagu soo bandhigayo waa gudniinka gabdhaha, guurka qasabka ah, dhaqan celis ama musaafurin dibadda iyo arrimo xad-gudub sharafeedka la xariira.

3. Gudniinka gabdhaha

Muxuu yahay gudniinka gabdhaha?

Gudniinka gabdhaha, waxaa kaloo dad badan ku magacaabaan gudniin Fircooni. waa fal lagu sameeyo xubinta taranka gabadha intiisa muuqda iyadoo aan baahi caafimaad jirin. Gudniinka gabdhaha waxay ku xiran tahay wadanka laga soo jeedo, Waxaa lagu sameeyaa ilmaha oo aad u yar, ilmaha oo soo roonaaday, dhalinyarta ama isla marka ay gabadha ama haweenka guursaneyso.

Noocyadee oo gudniinka gabdhaha ayaa jira?

Ururka caafimaadka addunka (WHO) waxay u kala qaybiyey gudniinka gabdhaha afar nooc:

- **Nooca 1:** Goyn qeyb ama dhamaan kintirka qeybta muuqda ama keliya xuubka kintirka agagaarkiisa (**clitoridectomie**).
- **Nooca 2:** Goyn qeyb ama dhamaan kintirka qeybta muuqda ama dhamaan iyo faruuraha yar yar, iyadoo marna la goynaayo faruuraha waaweyn marna la deynaayo (**excisie**).
- **Nooca 3:** Noocaani waxaan la goynayaa xubintii kintirka, faruuryaha, ka dibna waa la tolaa,waxaana gabadha loo reebaa dalool yar oo loogu talagalay inay marto kaadida (**infibulatie**).
- **Nooca 4:** Dhamaan falalka dhibaatada leh ee xubinta taranka ee gabadha iyadoo aan daruuriyad caafimaad jirin, sida, mudista/ sarid, inla xardho, Xoqid, iyo gubitaan.

Intee jeer ayaa gudniinka gabdhaha la sameeyaa?

Gudniinka gabdhaha waa dhibaato dunida oo dhan ka jira: kama dhacdo keliya Afrika, laakiin Bariga-dhexe, Aasiya iyo koonfurta- Amerika. Dunida oo dhan ugu yaraan 200 malyuun oo gabdho iyo dumar ayaa la guday. Sannad walba waxaa khatar ku jira qiyaastii 4 malyan oo gabdho ah in la gudo. Dhaqan ahaan waxaa gudniinka lagu sameeyaa gabadha gurigeeda, iyadoo aan la kabaabyayn iyo xaalado nadaafad daro oo jira kara, waxaana gudo badanaa umuliso dhaqameyd.

Wadamada Afrikaanka ee inta ugu badan sameeya:



1.	Somaaliya	(99%)
2.	Geney	(95%)
3.	Jabuuti	(93%)
4.	Mali	(89%)
5.	Masar	(87%)
6.	Suudan	(87%)
7.	Eritareeya	(83%)
8.	Siral yoon	(83%)
9.	Gaambiya	(76%)
10.	Etoobiya	(65%)

Ka timid: SHDS, DHS, MICS, EHIS, EPHS

Immisa gabdhaha jooga Nederlaan ayaa khatar ku sugan?

Waxaa Nederlaan degan **41.000 dumar** oo gudan. Qiyaas ahaan **4.200 gabdhood** (ayaa 20 sano ee soo soocda) ku jira khatar in la gudo ah. Qeybta ugu badan ee dumark gudan ee jooga Nederlaan waxay ka kala yimaadayn (82%) Soomaliya, Masar, Itoobiya, Eritareeya, Sudaan iyo Kurdida gobolka madaxbanaan ee Ciraaq.

Maxaa gabadha loo gudaa?

Sababaha waalidka ay gabdhahooda u gudaan, way kala duwanyihiin qoys ahaan iyo bulsho ahaanba. Sababaha soo socda ayey bulshada wax guda sheegaan:

- Waa caado dhaqameed
- Waxay kordhineysaa fursada guurka gabdhaha
- Waxay xafideysaa ama dhowraysaa bikranimada gabadha iyo sharafta reerkeeda
- Waxay u yeesha gabadha darajo ama maqaam bulshada dhexdeeda ah
- Waa wax diinta fareyso
- Kor u qaadid dhinaca nadaafada, quruxda iyo daahirnimada

Maxaa dhacaaya haddii aan gabadha la gudin?

Bulshooyinka ay gudniinka gabdhaha dhaqanka u ah, gabadha aan gudnayn dhibaatooyin badan ayey la kulmi kartaa. Reerka iyo bulshada waxay gabadha u arkaan inay daahir ahayn iyo waxaa looga shakiyaa inay dhaqan xumo sameyso aan la joojin karin.Sidaa awgeed ayaa

gabadha culeys la saarayaa si loo soo gudo. Gabadh aan gudnayn “furan” reerka ayey ceeb u keentaa, waa la faquuqaa, fursada guurgeeduna waa yaryahay.

Maxay yihiin khatarta caafimaadka?

Gabdhaha iyo dumarka gudniinka soo mary waxay noloshooda oo dhan khatar ugu jiraan dhibaatooyin jir ahaan iyo nafsiyad ahaan iyo dhibaatooyin xagga galmada. Khatarta dhibaatooyinka caafimaad ee gudniika waxaa loo kala saaraa kuwa deg deg ah iyo kuwe dambe.

Khatarta deg deg ah ay la kulmi karaan gabdhaha waxaa ka mid ah:

- Xanuun aad u fara badan
- Dhiig bax aad u daran
- Caabuqa ama infekshan
- Dhibaato xagga kaadida
- Naxdin ama argagax
- Geeri imaan karto

khatart ay mustaqbalka la kulmi kaaraan:

- Dhibaatooyin kaadida
- Dhibaato xubinta taranka
- Dhibaatooyin caadada ah
- Dhibaatooyin galmada
- Dhibaatooyin maskaxda ah
- Dhibaatooyin marka ay dhaleyso

Daryeelka dumarka gudan

Dumarka xanuunka ay qabaan mar walba kuma fekeraan inu falkaasi sabab u yahay. Ceebsasho ama aqoon yari awgeed ayaa dumarka aysan wax caawino ah u raadinin. Badankooda ayaa sidaa awgeed waxay ku nool yihiin xanuuno mar mar si fudud wax looga qaban karo. Sidaa darteed ayaa GGD ay sameeyaan **saacad qaabilaad** oo daryeelka dumarka gudan iyo dhibaatada ay ka cabanayaan loogala hadlo.

Saacadan qaabilaada ee daryeelka waxaa dumarka gudan fursad u helayaan inay su’ aalo weydiiyaan, xanuunkooda ka hadlaan iyo haddii loo baahdo loo diraayaa caawiye kale. Magaalooyinka leh saacadaha qaabilaada ee daryeelka waa Amsterdam, Den haag, Rotterdam, Waqooyiga-Nederland, (Groningen, Leeuwarden & Assen), gobolka IJsselland iyo Waqooyi- Bariga-Gelderland.

Muxuu qabaa sharciga Nederlaan xagga gudniinka gabdhaha?

Bulshada Caalamiga waxay u arkaan gudniinka gabdhaha nooc ka mid ah dhibka loo geysto dumarka iyo xad gudub asaasi ah oo xaquuqda bani’ aadamka. Nederlaan waxaa ay leedahay siyaasad ah inaan marna la oglaaneynin (zero tolerance). Ilaa 1993 waa la mamnuucay gudniinka gabdhaha xag sharci ahaan.

- Dhamaan noocyada gudniinka gabdhaha waa dembi ciqaab mudan waxayna hoos imaadaan dembiyada guud ‘ jir dilka’ (qod. 300 e.v. Buuga Sharciga Ciqaabta)
- Haddii gabadha Nederlaan lagu gudo mar walba waa dembi ciqaab mudan. Taasi waxay qabaneysaa qof walba oo Nederlaan jooga, sidoo kale dadka aan sharciga lahayn.
- Ciqaab xabsi ah ugu badnaan 12 sano. Laakiin haddii waalidka gabadha dhalay ay iyaga gudniinka sameynayaan, ciqaabta way ka badan tahay (ugu badnaan 16 sano).
- Marka waalidka ay amar ku bixiyaan in la gudo gabadha, dhinaca kharashka ay bixiyaan, qalabka keenaan lagu fulinaayo gudniinka ama ay caawinayaan waqtiga gudniinka, iyagana ciqaab ayey mudan yihiin
- Sidoo kale dhakhaatiirta sameeya gudniinka gabdhaha waxaa lala tiigsan karaa sharciga anshaxa arrimaha caafimaadka.

Muxuu yahay cadeynta gudniinka gabdhaha?

Wasaarada Caafimaadka, Daryeelka iyo Isboortiga (VWS) waxay si wadajir ah Wasaarada Cadaalada,hawgalayaasha iyo ururada kale ee la shaqeeya waxay soo saareen cadeyn gudniinka gabdhaha ka soo horjeeda.

Cadeyntan waa dokumenti waxaa loogu talo galay waalidka ka yimid wadamada uu ka jiro gudniinka oo raba inay halkaasi fasax u aadaan. Waxay waalidka siineysaa cadeyn ah in gudniinka gabdhaha uu ka mamnuuc yahay Nederlaan oo ciqaab uu qofka ku dhacaayo. Waxaana Nederlaanka ka sokow uu ku qoran yahay Inglishka, Faransiiska iyo waxaa la helaayaa asagoo ku qoran af-Soomaaliga, carabiga, Amxaariga(Itoobiya) iyo Tigriinjiga (Eritareeya) . Waxay waalidka u tahay **caawino dheeraad ah** markaasoo ay waalidka iskaga celin karaan culeyska bulshada ama qoyska ay saari karaan.

4. Guurka qasabka

Muxuu yahay guurka qasabka ah?

Guurka qasabka waa qofka oo lagu qasbaayo inuu guursado qof aysan iyado ama asaga dooranin. Taasi waxaa sameeya waalidka , qoyska/ qaraabadda ama dadka kale ee degaankooda ah. Haddii mid ka mid ah dadka is guursanaayo uu yahay da'yar ama qaangaar ahayn, waxaa taasi loo yaqaan 'guurka ilmaha'.

Meeqa jeer ayaa uu dhacaa guurka qasabka ah?

Dadka jooga Nederlaan ee la kulma guurka qasabka waxaa lagu qiyaasaayaa inta u dhaxeysa 350 iyo 1000 sannadkii. Guurka qasabka waxaa gaar haan ku dhacaa dhalinyarta u dhaxaysa 16 iyo 25 jir. Badanaa waa gabdho iyo dumar, laakiin mar mar waa wiilal iyo niman.

Guurka qasabka ee wadankaan waxaa u badan bulshooyinka soo galootiga ama qaxootiga ah, sida Turkida, Marokaanka, Surinaamka-Hindostaanka, Soomaalida, Siiriyaanka, Iraanka, Ciraaqda, Afgaanistaanka, Pakistaanka, Koerdische, Shiineeska, Molukiga, Roma- iyo bulshadaha kirishtaanka aadka u culus ee Nederlaan[1].

Maxaa qofka loo qasbayaa inuu guursado?

Guurka qasabka waxaa loo arkayaa qaab danaha reerka ama bulshada lagu sugo, xiriirka qoyska lagu xoojiyo ama lagu xaliyo dhibaatooyinka.

[1] Landelijk Knooppunt Huwelijksdwang en Achterlating (2022). Factsheet Huwelijksdwang, beschikbaar via https://www.huwelijksdwangenachterlating.nl/sites/www.huwelijksdwangenachterlating.nl/files/2023-03/Huwelijksdwang-februari%202023.pdf en Augeo (2023). Huwelijksdwang, beschikbaar via https://www.augeo.nl/nl-nl/huwelijksdwang/

Waxaa kaloo jiro xaalado qofka lagu qasbaayo inuu guursado si uu sharafta reerka u badbaadiyo ama si uu u helo sharci deganaansho. Ceebeyn xagga online-ka (shaming) waa uu noqon sabab guurka qasabka ah.

Goormaa uu jiraa guurka qasabka?

Cadaadiska la adeegsanaayaa wuxuu noqon karaa mid khafiif ah ilaa mid xoog badan.. Mar mar waxaa jira culeys bulshada ah, xagga maskaxda iyo cabsigelin.. Laakiin waxaa kaloo jiri kara dhibaato jir ahaan, faquuqid ama handadaad iyagoo dibada looga soo tagaayo. Haddii uu qaabkaasi isu bedelo (handadaad) gacan ka hadal, markaa waxaa loo arkayaa dhaqan ciqaab mudan.

Muxuu yahay guurka xabsiga?

Guurka xabsiga waa xaalad qof jecelyahay in la furo, xorna uma ah waayo qofkii kale ayaa diidan inuu furo.. Badanaa arrimahan dumarka ayaa dhibane u ah.

Muxuu ka qabaa sharciga Nederlaanka guurka qasabka ah?

Guurka qasabka ah Nederlaan waa ka mamnuuc waana arrin ciqaab mudan (qod. 284 Buuga sharciga ee Ciqaabta):

- Eedeysanaha waxaa ugu badnaan 2 sano oo xabsi ayaa lagu xukmi karaa.
- Waana arrin ciqaab mudan in qof Nederlaan ka socda inuu dibada qof ku qasbo inuu guursado.
- Nederlaan marka hore waxaa ku guursanaysaa xagga sharciga.

Markaa ka dib ayaa diinta ku guursan kartaa. Markaa sheekh, priester-ka ama sheekha yahuuda waa arrin ciqaab mudan haddii ay guur diini ah sameeyaan dad aan xagga sharciga isku qabin. (qod. 449 Buuga Sharciga ee dembiyada).

- Guurka ilmaha Nederlaan waa mamnuuc: si aad u guursan kartaa waa inaad labada lammaane ay ugu yaraan 18 jir ahaadaan.
- Ma guursan kartid dadka reerkaaga, sida waalidka awoowe/ayeeyoyaasha, ilmaha, ilmaha ilmahaaga dhaleen, walaalaha wiilasha ama walaalaha gabdhaha iyo ilmaha la soo koriyey.
- Guursashada ilmo adeer/abti habaryar/eedo waxa keliya la oggol yahay haddii ay labada qofood ay iyaga is doorteen.
- Guurka xabsiga ah waa arrin ciqaab mudan Nederlaan (Sharciga Guurk Xabsiga). Lammaanaha iyo reerka ama bulshada waa lala tiigsan karaa sharciga.

5. Ka soo tegida/dhaqan celis

Muxuu yahay ka soo tegida?

Ka soo tegida waxaa qofka looga soo tagayaa dibada asagoo aan rabin iyadoo (la celinaayo).Waxayna badanaa dhacdaa fasaxa ka dib. Qasbida wuxuu ka yimaadaa ninka, waalidka, ama reerka oo dhan. Baabsaboorka, sharciga deganaansho, taleefoonka gacanta, iyo kaarka bangiga ayaa dhibanaha laga qaadaa si loo hubiyo ineysan ku noqon karin Nederlaan.

Immisa jeer ayey dhacdaa ka soo tegida?

Qiyaastii waxaa sannadkii ilaa 150-800 qofood ayaa dibada looga soo tegaa. Inta badan waa dhalinyar da'dooda u dhaxeysa 14-18 jir iyo dumar waaweyn oo da'dooda u dhaxeysa 20 iyo 35 jir (iyagoo caruur la socda ama la socon). Xitaa wiilal ama niman ayaa dhibane noqon kara. Arrintaan waxay ku badantahay Waqooyiga -Afrika (Marooko, Aljeeriya, Masar), Galbeedka Afrika (Geney, Gaana,Nayjeeriaya) Bariga-Afrika Oost-Afrika (Somaaliya,, Itoobiya, Suudan) iyo Bariga- Dhexe (Ciraaq, Iraan, Afgaaanistan,Turkiyaa, Paakistaan, Indiya, Suuriya)[2].

Maxaa qof dibada looga soo tagaa?

Waalidka sababo kala duwan ayey aaminsanyihiin oo ay ilmahooda dibada uga soo tagaan. Waxay ka baqaayan inay ilmahooda dhaqano kale ka qaataan oo 'reer galbeedka' ah. Mar mar waalidka waxay rabaan inay dhaqan xumo ka hortagaan, sida la socodka carruurtooda asxaabta xun xun, iskuulka oo ay ku liitaan ama dhaqan qalafsanaan dhinac dabeecada iyo tuhun sida qaniisnimada. Laakiin dadka waaweyn oo la dhoofiyo waxaa sabab u noqon kara dhibaato guurka ah ama badbaadinta sharafta reerka ayaa dowr ciyaari kara go'aanka ah in qofka dibada looga soo tago. Inta badan carruurta waxaa la geeyaa qoyska ama qaraabo, ama waxaa lagu xareeyaa xaruumo (gaar ahaan wiilasha). Arrimahan waxay ku reebtaa dhibaatooyin caafimaad darro oo jir iyo maskaxda ah.

Muxuu ka qabaa sharciga Nederlaanka uga soo tegida dibada?

Ilmaha waxay xaq u leeyihiin badbaado, daryeel, waxbarasho, iyo meel amaan ah ay ku noolaadaan. Marka laga soo tago waa nooc daryeel daro ilmaha ah iyo dayacnaan, xitaa haday waalidka u maleynayaan inay danta ilmahooda u dadaalayaan.

Sharciyada soo socdaa ayaa sababi kara ciqaab waalidka ama reerka:

- Waalid ahaan waxaad heysataa "masúulnimada waalidka" ee ilmahaaga. Taasi iskama joojin kartid (qodobka 279 Buuga sharciga Ciqaabta).
- Qof caafimaadkiisa khatar ma gelin kartid.
- Qof kuma qasbin kartid inuu wax sameeyo. (qodobka 284 Buuga sharciga Ciqaabta).
- qod. 26 Waajibka waxbarashada: waalidka ciqaab ayey mudan karaan haddii ay ilmahooda ay dibada uga soo tagaan iyagoo aan fasax waajibka waxbarashada (5-16 jir) aan qaadanin.

[2] Landelijk Knooppunt Huwelijksdwang en Achterlating (2022). Factsheet Gedwongen Achterlating, beschikbaar via https://www.huwelijksdwangenachterlating.nl/sites/www.huwelijksdwangenachterlating.nl/files/2023-03/Gedwongen achterlating-februari 2023.pdf

6. Rabshadaha la xiriir sharafta

Muxuu yahay rabshadaha la xiriir sharaft?

Wuxuu yahay dhibaato maskax ahaan ama jir ahaan la geysto si sharafta ama 'magaca wanaagsan'ee qoyska loo xafido ama loo hagaajiyo. Gabdhaha iyo dumarka waxay leeyihiin mas'uuliyad inay badbaadiyaan ama dhawraan sharafta-qoyska ama reerka, halka ay waalidka, nimanka iyo wiilasha masuuliyadoodu tahay inay sugaan iyo haddii loo baahdo ay dib u hagaajiyaan sharaftan. Inta badan waxaa ku lug leg reerka oo dhan mamarka qaarna xitaa bulshooyinka ayey qusaysaa. Xaalada ugu daran waa dhibanaha oo la dilo.

Maxaa ka mid ah tusaalooyin xad gudub sharafta?

Dhowr tusaale oo xad gudub sharafta waa:

- jir dil (garaacid, harraati)
- dhibaateyn maskax ahaan (xakamayn adag, xaqiraad, hanjabaad)
- diidmo/dayrin ka timaada dhinaca qoyska
- (qasab) isdilitaan
- dil sharafeed

Immisa jeer ayey dhacdaa xad gudub sharafeed?

Waxay sheegayn boliiska in sannadkii 2.500-3.000 fal dembiyeed xad gudub sharafta reerka (loo maleynaayo) inay dowr ka ciyaartay. Waxaa jira sannadkii 7-17 dhibanayaal ku dhinta Nederlaan. Boliiska wuxuu u malaynayaa inay dhacdooyinkani intaa ka badanyihiin, maadaama arrimo badan aan boliiska loo gudbinin. Taasoo sababeyso cabsi oo dhibkan xasaasiga in laga hadlo awgeed.

Maxay yihiin sababaha loo sameeyo dhibka xad gudubka sharafta?

Waxaa jira fikrado dhaqamayd ku saabasan dowrka dumarka iyo ragga, ee dhinaca galmada iyo xaquuqda taranka dumarka. Sharafta dumarka waxay ku xiran tahay xaalada dumarnimo iyo dhaqankeeda. Sharafta xaalada galmood ee dumarka waxay ku xirantahay sharaft qoyska.

Xaaladahan soo socda waxaa ku jiri kara dhib arrimo xad gudub sharafta:

- waxaa jira khilaafyo ka dhasha tusaal ahaan dhaxalka
- bigra jebin ku dhacda gabadha guurka ka hor
- xiriir ka baxsan guurka
- rabitaan furriin
- qofka oo lagu heysto xagga habdhaqanka, qaabka dhar xirashada ama xirfadda shaqada
- qoyska dad ka mid ah oo la caayo
- qof diida guur lagu qalqaaliyey
- nooca jinsiga qofka uu jeclaado
- inuu qof diido ka qeyb qaadasho dagaal loo qaadaayo qof kale ee arrimahan lagu ilaalinayo sharafta qoyska

Muxuu ka qabaa sharciga Nederlaanka rabshadaha sharaft la xiriira?

Dalka Nederlaan rabshadaha la xiriira sharaft waa dembi ciqaab mudan. Ciqaabta uu dembiilaha helaayo, waxay ku xiran tahay waxa dhabta ah ee dhacay. Haddii uu jirdil yahay waxaa dembiilaha la xiri karaa xabsi dhowr bilood ah (qodobka 300 Buuga sharciga Ciqaabta Dembiyada) iyo dilka oo laga soo fekeray waa xabsi daa'in (qodobka 289 Buuga sharciga Ciqaabta Dembiyada).

7. Caawinaada jira

Xageed ugu baahan tahay caawimaad?	**La xariir**
Ma ku jirtaa khatar degdeg ah mise waxaa ku haysto gacan ka hadal?	Wac booliiska: 112
Hadduna jirin khatar degdeg, laakiin caawinaad u baahan tahay? Wac **Veilig Thuis**. Waa 24/7ayaa wici kartaa, waa lacag la'aan xitaa si qarsoodi waa la xiriiri kartaa.	Wac 0800 - 2000 Marka aad dibada joogto: +31 70 311 90 07 Waad la sameyn kartaa chat-ka websaaytkooda ka eeg www.veiligthuis.nl.
Ma lagaaga soo tegey dibada ama ma jiraa guur lagugu qasbinaayo oo dibada ah? Markaa la xariir Landelijk Knooppunt Huwelijksdwang en achterlating (LKHA). Waxaad kaloo (si qarsoodi ah) ula xariiri kartaa si ay kuula taliyaan.	+31 70 345 43 19 www.huwelijksdwangenachterlating.nl ama LKHA@veiligthuishaaglanden.nl

Xageed ugu baahan tahay caawimaad?	**La xariir**
Ma u baahan tahay caawino dibada ah? **Wasaarada Arrimaha Dibada** ayaa caawisa dhibanayaasa Nederlaanka ee guurka qasabka iyo dibad uga soo tegida ee raba inay Nederlaan ku soo noqdaan. La xariir safaarada Nederlaanka ee waddanka aad joogto. Ama weydii 24/7 xarunta la xariirka ee Arrimaha Dibada caawino.	Waxaad ka wici kartaa: +31 247 247 247 Whatsapp-ka waa: +31 6 823 877 96
Ma u baahan tahay caawino ama warbixin ku saabsan dumarka la qariyo/ maqbiyo iyo guurka xabsiga ah?	**Femmes for Freedom** +31 70 362 65 06 info@femmesforfreedom.com www.femmesforfreedom.com
Ma gudan tahay ama ma raadineysaa daryeel caafimaad iyo/ ama daryeel maskaxda? Markaa waxaad la xariiri kartaa xarumaha GGD.	www.pharos.nl/infosheets/meisjesbesnijdenis-vgv-spreekuren/
La xiriir **Ururka Soomaalida ee Nederlaan** (FSAN) waxey bixiyaan warbixin, tababar/aqoon isweydaarsi iyo talooyin ku saabsan gudniinka gabdhaha iyo dhaqamada dhibaatada leh. Waxaad kaloo warbixin laga siin karaa wacyigaliyaasha gobalkaada jooga.	+31 20 486 16 28 | +31 6 288 548 84 info@fsan.nl www.fsan.nl

Qoraalkan waa qeyb ka mid ah mashruuca: Verandering door verbinding met sleutelpersonen. Mashruucan waxaa kharashka bixiyey Wasaarada caafimaadka Daryeelka iyo Isboortiaga ee dalka Nederlaan

Soo saaray:	Dallada ururadda Soomaaliyeed ee Nederlaan (FSAN)
Isku duwaha:	Zahra Naleie
Qoraalka:	Amani Abdalla
La akhriyey:	Dr. Annemarie Middelburg
Muuqaalka u sameeyey:	DG Graphic Design
Daabacaada:	De Koning Repro
Xuquuda daabacaada	

FSAN
Alpen Rondweg 102-R
1186 EA Amstelveen
+31 20 486 16 28 | +31 6 288 548 84
info@fsan.nl

Buug yarahani waxaa loogu talagalay dadka soo galootiga iyo dadka qaxootiga oo raba inay wax dheeraad ka ogaadaan dhaqamada dhibaatada leh.

Waxaan rabnaa inaan kuugu deeqno warbixin qiimo leh si aan kaaga caawino inaad fahanto waxa ay yihiin dhaqamada xun xun ama dhibaatada leh, sababaha ay u dhacaan, waxa uu qabo sharciga Nederlaanka iyo sidaa aad nafsadaada iyo tan dada kale u badbaadin karto.

Ulajeedadeena waa inaan wacyigelin abuurno, wadahadalka ka qeyb qaadano iyo dhiiro gelino si tallaabo loo qaado.Wadajir ayaan isbedel wanaag ah ku gaari karnaa iyo aan taakulo ka geysan karnaa si dunida u noqoto mid ay dhaqamada dhibaatada leh ka dhamaadaan.

FSAN | Federatie Somalische Associaties Nederland

Mede mogelijk gemaakt door het Ministerie van VWS

Alpen Rondweg 102-R
1186 EA Amstelveen

T: +31 20 486 16 28 | M: +31 6 288 548 84
E: info@fsan.nl | www.fsan.nl